

“Sida ugu wanaagsan ee dhibaataada looga gudbo waa in dhibaataadu la maraa.”

*Qof aan la magac aqoon*




“Waxa innaga dambeeya iyo kuwa innaga horeeya waa arrimo yaryar marka la barbardhigo waxa inna dhexyaalla.”

*Ralph Waldo Emerson*



### GOOBTA XAFIISKA:

Family Intervention Program (FIP)  
(Family Safety Center)  
610 Murfreesboro Pike  
Nashville TN 37210



Barnaamijka Waxqabadka Qoyska (FIP) wuxuu ku yaallaa gudaha Xarunta Bedqabka Qoyska. Marka aad timaado, iska soo xaadiro kooxda ammaanka.



Loogu talagalay wacitaanka ballanta (615) 862-7773

Mashruucan ayaa waxaa taageeray Lr. Abaalmarinta 2017-VA-GX-0051 oo uu abaalmarintisu bixiyay Xafiiska Dhibbanayaasha Dembiyada, Xafiiska Barnaamijyada Caddaaladda, Wasaaradda Caddaaladda ee Mareykanka iyada oo loo marayo Xafiiska Tennessee ee Barnaamijyada Caddaaladda Dembiyada.

Somali

## DIB U QORSHEYNTA WADAJIRKA AH EE NOLOSHA



## MARKA ADIGA AMA QOF AAD GARANAYSO UU DEMBIGA TAABTO.

Mar kasta oo uu dembi dhaco, dad badan ayuu saameeyaa —dhibbanaha, xubnaha qoyska, saaxiibada, iyo xitaa bulshadda oo dhan. Cidna uma diyaarsana saameynta jireed iyo midda dareen ee dembiga kuwaas oo burbur u keenna kuwa ay waxyeellada loo geystay iyo qoysaskooda iyo saaxiibadooda. Iyada oo ka damqaneysa dhibaataada dhabta ah ee ay maraan dadka uu taabtey dembiga, ayaa Waaxda Booliska Magaalada Nashville (MNP) waxaa bixinayeen adeegyo la-talin, u-qareemeyn, iyo taageero la siiyo dhibbanayaasha dembiyada iyo kuwa kale ee noloshooda uu taabtey dembiga rabshadaha wata tan iyo 1975.

## CAAWIMAADDU WAA TAN

Sannadkii 2016, labo ka mid ah barnaamijyada u-qareemeynta iyo la-talinta ee MNP, Barnaamijka Waxqabadka Dhibbanaha (VIP) iyo La-talinta Tacaddi Ka Dhex Dhaca Qoyska ayaa la mideeyay si ay u noqdaan Barnaamijka Waxqabadka Qoyska (FIP). Adeegyada ayaa waxaa lagu saleeyay fikirka ah in qof kasta ee soo marta dhibaato sabab u ah fal dembiyeed in la siiyo waxqabad wax looga qabanayo dhibaataada degdeg ah oo bilaashna ah iyo la socosho. Iyada oo ay ka hawlgalaan xirfadlayaal caafimaadka dhimirka oo shatiile ah, iyo u-qareemayyaal aqoon u leh, ayaa FIP waxaa ka go'an in uu caawiyo kuwa ay taabteen rabshadaha si ay u helaan looguna soo celiyo dareen nabadeed iyo isku-dheelitirnaanta noloshooda. Go'aanka dhibbanaha ee ku saabsan dacwad oogista ma saameeyo u qalmidda.

Hiiigsiga barnaamijka FIP waa bixinta adeegyada caafimaadka maskaxda iyo u-qareemeynta nidaamka caddaaladda mar kasta oo ay shakhsiyaad, qoysas, iyo/ama bulsho uu taabto dembi rabshado wata. Dhammaan adeegyadu waa kuwo bilaash ah, qarsoodi ah, oo waxaa lagu bixiyaa deegaan taageera kala duwanaansho dhaqan: iyada oo la tixgelinayo isirka, diinta, caqiidada iyo jihada galmada.



## ADEEGYO BADAN OO KALA DUWAN

Hawlwadeenno naxariis badan leh oo dhaqan ahaan waxtar leh ayaa bixiya:

### WAX-KA-QABASHADA DHIBAATADA

Ka jawaabidda wacitaannada telefoonka oo 24-saac ah oo la siiyo dhibbanayaasha iyo muwaadiniinta, oo ay bilaabaan sarkaalka/saraakiisha ka jawabaaysa, marka dembiga la soo sheego.

### LA-TALIN

Adeegyada la talin xirfadeed oo la siiyo shakhsiyadaadka, xubnaha qoyska iyo kuwa kale ee uu taabtey dembiga. Kooxo taageero loogu talagalay dhibbanayaasha/kuwa ka soo badbaaday dhibbaataada ee kala duwan ayaa sannadka oo dhan la bixiyaa.

### WAX-KA-QABASHADA KOOXDA DHIBAATADA

Waxqabadka kooxda dhibaataada ayaa codsi lagu bixiyaa marka ganacsiyada, dugsiyada, ama kooxaha kale ay rabshado taabtaan.

### U-QAREEMEYNTA IYO MAAREYNTA KIISKA

Hagid, taageero, iyo caddeynta inta ay socdaan nidaamyada dacwadda booliska iyo maxkamadda. Caawimaad ayaa la heli karaa si loo helo baahiyada aasaasiga ah iyo xareynta Magdhowga Dhaawaca Dembiyada ee TN.

### ADEEGYADA TAKHASUSKA AH

In goobahooda loogu tago/u-qareemeynta dhaqan ahaan waxtarka leh ee dadka kala duwan ee magaalada Nashville oo ay ka mid yihiin kuwa ku takhasusey qaxootiga iyo muhaajiriinta, hawlwadeennada labada luuqadood ku hadla, macluumaad ku qoran luuqado badan, iyo isticmaalka turjumaanno marka loo baahdo.

### WADA-TASHI IYO TABABAR

Soo-bandhigyo ayaa la heli karaa oo loogu talagalay kooxaha bulshada iyo xirfadlayaasha si loo kordhiyo wacyiga iyo fahamka adeegyada FIP, saameynta naxdinta/dhibaataada; iyo wacyiga dhaqan ahaaneed iyo waxtarka dhibbanayaasha dad gaar ah.

### MACLUUMAADKA IYO GUDBINTA

Isuduwidada bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka, adeegyada bulshada iyo nidaamka caddaaladda dembiyada.

## WAA WICITAANKAAGA

Hadafka ugu muhiimsan ee Barnaamijka Waxqabadka Qoyska waa in lagu caawiyo shakhsiyaadka iyo kuwa ay jecel yihiin in ay dib u sheegtaan dareenka caafimaadka iyo faydaqabka wixii ka dambeeya dhibaataada. Haddii adiga ama qof aad taqaanno uu yahay dhibbanaha dembiga, fadlan wac lambarka ugu habboon ee ku qoran hoos.

**Barnaamijka Waxqabadka Qoyska (615) 862-7773**

### LAMBARADA KALE EE XIRIIRKA

Baaritaannada booliska:	
Xaafadda Waqooyi	(615) 862-7901
Xaafadda Koonfureed	(615) 862-7763
Xaafadda Bari	(615) 862-7525
Xaafadda Galbeedka	(615) 862-7385
Xaafadda Midtown Hills	(615) 880-1513
Xaafadda Hermitage	(615) 862-6993
Xaafadda Madison	(615) 880-3311
Xaafadda Dhexe	(615) 862-7044
Qaybta Dembiyada Galmada	(615) 862-7540
Qaybta Tacaddiga Ka Dhex Dhaca Qoyska	(615) 880-3000
Xafiiska Xeer-ilaalyaha Degmada	(615) 862-5500
Magdhowga Dhaawaca Dembiyada ee TN	(615) 741-2734

### U NOQO QAYBTA DAMBE SI AAD U HESHO

KHARIIDADDA IYO JIHOOPYINKA.



(615) 862-7773